

## OFFICIAL

Mudanaha/Marwada guriga degan

### **WIXII KUSOO CUSBOONAADAY DHISIDA GURYAHA IYO DIB-U-DHISKII LAGU WADAY SARAHA DHAADHEER**

Homes Victoria waxay qoraalkan kuugu soo diraysaa si laguula socodsiiyo halka ay marayaan howlihii guryo dhisida iyo barnaamijka dib loogu dayactirayo saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Tani waxay ka dhigan tahay inaan hadda 9 xaafadood ka bixinayno guryo ka wanaagsan, ka amni fiican sidoo kalena ka raaxo badan kuwii hore guryahaas oo la siinayo dadka hada meesha degan iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba.

**Warka maanta la shaaciyay ma saameyn doono dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

### **Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?**

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Waxaan si joogto ah ula xiriirna dadka deggan dhismayaashan cusub. Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta ay howlaha dib-u-dhiska socdaan.

### **Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow**

Guryo cusub ayay hadadanba dhismahoodu ka socdaan meel goobta ka ag dhow si ay dadka meesha deggan uga caawiyaan fursadaha dib u dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Simmons Street, South Yarra
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Holland Court, Flemington

Guryahan waxay noqon doonaan kuwo si sahlan loo kululeyn karo loona qaboojin karo, raaxana ay ku dareemayaan dadka baahiyaha dhaqdhaqaaqa leh iyagoona ay ka ag dhow yihiin meel gadiidka dadweynaha laga raaci karo. Waxay sidoo kale lahaan doonaan amni, iftiin iyo hawo wanaagsan waxaana intaas usii dheer inay lahaan doonaan balakoono iyo qolal kuu gooni ah oo dharka lagu dhaqdo.

### **Maxaa ka socda meelaha kale?**

**Elgin iyo Nicholson Streets ee Carlton**, qorshayaasha guryaha cusub waxaa hagayay talooyinka ay nala wadaageen dadka meesha deggan. Duminta ayaa hadda socota si loo bixiyo 248 guri oo ah guryo cusub oo ku yaal xaafad si wanaagsan loo nashqadeeyay marka la gaaro 2031.

Qoysaska kusii haray **Flemington iyo North Melbourne** ayaa laga caawinayaa sidii ay u guuri lahaayeen. Intaan isu diyaarinayno inaan bilowno burburinta dhismayaashii hore, waxaan tixgelineynaa ra'yiga dadka deegaanka iyo waxay jeclaan lahaayeen inay guryaha cusub lahaadaan.

Dadka guuraya ee degan **South Yarra iyo Richmond** ayaa sii wada howlaha guuritaanka iyadoona ay qoysas badan u guureen guryo cusub oo goobta ka ag dhow. In ka badan 85% qoysaska ayaa mar hore guuray, ama hada ayay qorsheynayaan inay guuraan, dhammaantoodna waxaa meel fiican u maraya howlaha guuritaanka si ay usoo gebagebeeyaan bisha Febraayo 2026.

### **La socio wixii soo kordha oo nagu xirnoow**

Waxaad booqan kartaa [homes.vic.gov.au](https://homes.vic.gov.au) si aad u hesho macluumaad ku saabsan barnaamijka dib u dhiska, macluumaadkaas oo ay kujirto mid ku qoran luqadaada.

Waad nagu xirnaan kartaa haddii aad isdiiwaangeliso si aad joogto ugu hesho wixii soo kordha iyo ogeysiisyada.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad booqato bogga internetka, la hadasho xafiiska guryeynta deegaankaaga, ka soo qaybgasho fadhiyada macluumaadka, aadna nagu xirnaato.

Mahadsanid

**Simon Newport**

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

search **homes victoria**



[homes.vic.gov.au](https://homes.vic.gov.au)



28/01/2026

search **homes victoria**



[homes.vic.gov.au](https://homes.vic.gov.au)

